

**Xeer M. J. - 17 Febraayo 1964, lamba. 63**

**Sameynta Guddiga Gurmadka Qaran ee Caawinaada Qaxootiga iyo Dadka ay saameeyeen dhacdooyinkii u horseeday xaalada degdegga ah.**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

Markuu arkay qod. 85 ee Dastuurka;

Markuu arkay Xeer-Sharci 8 Febraayo 1964, ee prot lamba. 0211481, Kaas oo ku dhawaaqay xaalad degdeg ah guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda;

Markuu tixgeliyay baahida degdega ah, iyo iyadoo la tixgalinayo xaaladda degdega ah ee lagaga dhawaaqay guud ahaan gayiga Jamhuuriyadda, in la sameeyo guddi heer qaran ah oo gurmadii sameeyo ururinta dhaqaalaha loogu gurmanayo qaxootiga iyo dadka ay saamaysay dhacdooyinkii xaaladda dalka, xaaladda degdeg ah lafteeda, iyo sidoo kale maaraynta lacagaha laftooda;

Markuu dhageestay Golaha Wasiirada;

Markuu arkay soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha;

**Wuxuu Go'aamiyay**

**Qod. 1**

Guddiga Gurmadka Qaran ayaa lagu dhisay Xaruunta Golaha Wasiirada, iyadoo ujeeddadu tahay uruurinta, maaraynta iyo qaybinta lacagaha iyo agabka loogu talagalay in lagu caawiyo dadka qaxootiga ah iyo dadka dhibaataysan, iyadoo laga duulayo dhacdooyinkii lagu go'aamiyay xaaladda degdegga ah oo lagu dhawaaqay Xeer cayiman ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Febraayo 8, 1964, ee borotokool lamba. 0211481.

**Qod. 2**

Guddiga Qaran ee Gurmadii Degdegga ah ayaa ka kooban Guddoomiye iyo lix xubnood oo ah muwaadiniin Soomaaliyeed, kuwaasoo lagu magacaabi doono xeer Ra'iisul Wasaaraha.

**Qod. 3**

Guddiga Gurmadii Qaran ayaa fadhligoodu yahay magaalada Muqdisho.

Xeer uu soo saaro Ra'iisul Wasaaraha kadib marka uu la tashado Guddiga Gurmadii Qaranka, ayaa waxaa lagu dhisi karaa Guddi-hoosaadyo ka kooban Guddoomiye iyo laba xubnood, oo ah muwaadiniin Soomaaliyeed, oo lagu magacabayso isla xeerkii lagu dhisi kaasoo sidoo kale qeexi doona howlaha la xiriira.

**Qod. 4**

Xeerkana ayaa si degdeg ah u dhaqan galaysa.

Waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah, waxaana lagu dari doonaa Ururinta Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Cid kasta oo mas'uul ka ah waxa ku waajib ah in ay ilaalo oo ay u ilaalo sida sharciga dalka.

Xamar 17 Febraayo, 1964.

**Aden Abdulla Osman**

Ra'iisul Wasaare

**Cabdirashiid Cali Shermarke**